



work for you

Taakulayn iyo isku beegid



Marka aad noo timaado ayaa waxaad qaaday talaabada ugu horeysa ee aad shaqo ama waxbarasho ku bilaabi lahayd. Dhinacyadaada waxaad ku haysataa horjoogahaaga caawinaada iyo taliyaha shaqaalaynta kuwaa oo ku taageeraya islamarkaana kuugu toosinaaya jidka aad ku heli lahayd shaqo. Hadafkeenu waa inaad sida ugu dhaqsiiyaha badan ku hesho shaqo ama waxbarasho kuugu habboon.

Diyaar ma u tahay inaad si dhaqso leh shaqo cusub ku bilowdo?

Waxaan kaa caawineynaa inaad hesho xiriirada shaqada ku habboon waxqabadkaaga iyo muuqaalkaaga shaqo. Shabagadeena xiriir waxay ku baahsan tahay waaxyaha shaqo iyo warshado iyo goobo badan, xiriiyadaa ayaadna gacanta ku dhigeysaa. Ujeedada ugu weyna waa inaad sida ugu dhaqsiiyaha badan shaqo kuugu habboon ku hesho. La taliyeyaasheena dhinaca shaqaalaynta ayaa waxay maalin walba la shaqeeyaan shaqo bixiyeyaal kala nooc ah sidaa ayaana shabagadeena xiriirka aan la leenahay shaqobixiyeyaasha uu si jooqto ah u kordhaa. Waxaynu si jooqto ah u cusbooneynaa macluumaadkeena ku saabsan baahida shaqaale ee shirkadaha kadibna waxaynu warbixintaada shaqsi ku raadinaa shaqooyinka bannaan.

Ma waxaad hor taagan tahay isbeddel ama miyaadan hubin waxa aad rabto inaad ka shaqeyso?

Waxaa dhinacaaga jooga gacanqabte oo aad wada qorsheyneysaan jidkaaga suuqa shaqada iyo sidaad shaqo ku heli lahayd ama waxbarasho ku bilaabi lahayd. Haddii waxbarashadu tahay tan aad markaa u baahan tahay waxad heleysaa la taliyaha dhinaca waxbarashada iyo xirfadaha si aad ku hesho koorasyada waxbarasho ee jira tan kuugu habboon iyo taakulayn si aad sida ugu dhaqsiiyaha badan ku bilowdo waxbarashadaada.

Habkan ayaad ku bilaabeysaa

Si aad ku hesho warbixin dheeraad oo ku saabsan barnaamijka “**Taakulayn iyo isku beegid - Stöd och matchning**” la xiriir gacanhayahaaga jooga xafiiska shaqada ama si aan kuu caawino noo soo dir emayl: nyttjobb@workforyou.se. Waxaad emaylka ku qortaa degmada aad rabto inaad ka bilowdo, kadibna mid ka mid ah shaqaalaheena kuu dhaw ayaa waqti gaaban kuugula soo xiriirayaa.

Nabadeey iyo aragti dambe!